GOBOLKA WASHINGTON
XAFIISKA DACWAD DHAGEYSIGA MAAMULKA

| | |
|---|---|
| Arrinka:<br><br>Magaca Racfaan-qaataha,<br>Nooca Racfaan-qaataha<br><br>Magaca Ka Jawaab-celiyaha,<br>Nooca Ka Jawaab-celiyaha | Lambarka Aqoonsiga Lambarka Kiiska<br><br>OGEYSIISKA DACWAD DHAGEYSIGA (MOD) (NOTICE OF HEARING (MOD))<br><br>Hay'adda: Waaxda Bulshada iyo Adeegyada Caafimaadka Qeybta Masruufka Caruurta (Division of Child Support, DCS) (Division of Child Support (DCS))<br>Barnaamijka: Magaca Barnaamijka<br>D # |

Qaybta Masruufka Caruurta (DCS) ayaa heshay codsiga dacwad dhegeysiga ee lifaaqa ku jira markey ahayd Taariikhda.

DACWAD DHAGEYSIGAAGA WAXAA LA QABAN DOONAA

Taariikhda: Taariikhda dacwad dhageysiga
Wakhtiga: Wakhtiga dacwad dhageysiga Waqtiga Baasifigga ama isla wakhtigaas ka dib sida ugu dhakhsaha badan ee Garsooraha Sharciga Maamulka lagu heli karo.
Sida: SHIR KU DHACAAYO TALEEFOON WICITAAN

Dhageysigaaga waxaa lagu qaban doonaa taleefan. Kahor dacwad dhageysigaaga, waa inaad soo gashaa si aad u bixiso lambar taleefoon oo lagaa soo wici karo wakhtiga dacwad dhageysiga. Waxaad ka soo gali kartaa onlaynka websaydkeena (www.oah.wa.gov) ama adoo ka soo wacaya Xafiiska Dacwad Dhageysiga Maamulka (Office of Administrative Hearing, OAH) lambarka 1-800-583-8271. Wakiilka DCS ayaa kaala soo xidhiidhi doona lambarkaaga taariikhda iyo wakhtiga kor ku xusan. **Waa inaad siisaa Xafiiska Dacwad Dhegeysiga Maamulka (Office of Administrative Hearing) lambar taleefoon halkaas oo lagaala soo xiriiri karo dacwad dhageysiga, ama waxaa dhici karta in laguu geliyo ku guuldareysiga ka-soo jawaab-celinta habraaca dacwadeed. Fadlan dami sifa kastoo xannibeysa wicitaanka taleefankaaga.** Eeg Xeerka dib loo eegay ee Washington (Revised code of Washington, RCW) 34.05.440(2). Haddii aadan ka soo muuqan, waxaa laga yaabaa inaad waayi doonto xaqa aad u leedahay dacwad dhegaysiga. Haddii aad jeclaan lahayd inaad hesho qoraal ama iimayl xusuusin ah oo ku saabsan dacwad dhageysigaaga, fadlan kala xidhiidh Xarunta Wicista lanbarka 1-800-583-8271.

Wac Wakiilka DCS sida ugu dhakhsaha badan haddii aad **u baahan** tahay inaad beddesho wakhtiga ama taariikhda dacwad dhageysigaaga. Garsooraha Sharciga Maamulka ayaa go'aamin doona haddii aad haysato sabab wanaagsan si loo beddelo wakhtiga ama taariikhda.

Haddii aad ku jirto gacan-ku-heynta Xarunta Asluubta, fadlan la xidhiidh lataliyahaaga ama qofka aad u warbixiso ee jooga xarunta ka hor taariikhda dacwad dhagaysiga si aad u samayso qabanqaabada aad kaga qaybqaadanayso dacwad dhageysiga ku dhaceysa telefoonka.

**Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto dukumeentiyada aad heshay.**



TUSAALE

Fadlan akhri Soo koobidda Xuquuqda Dacwad Dhagaysiga ee ku lifaaqsan meeshan si aad wax uga ogaato xuquuqdaada, waxa ay tahay inaad keento, iyo sida dacwad dhagaysiyadu u shaqeeyaan. Macluumaad guud oo ku saabsan habka dacwad dhageysiga ayaa laga heli karaa websaydka Xafiiska Dacwad Dhageysiga Maamulka ee barta www.oah.wa.gov. Hubka fudud iyo hubka kale ee halista ah gabi ahaanba waa ka mamnuuc goobta dacwad dhageysiga iyo dhammaan xafiisyada Xafiiska Dacwad Dhagaysiga Maamulka. Xeerka Maamulka Washington (Washington Administrative Code, WAC) 10-20-010.

**U sheeg Xafiiska Dacwad Dhageysiga Maamulka ISLA MARKIIBA haddii ciwaankaagu ama lambarka taleefankaagu is beddel ku imaado.** Waxaa laga yaabaa inaan u baahano inaan kuu soo dirno ogeysiisyo iyo boostooyin kale oo ku saabsan dacwad dhageysiga.

**Kahor intaadan soo gudbin wax dukumeenti ah, fadlan dib u eeg oo buuxi Shaacinta Xogta Qarsoodiga ah ee ku lifaaqan meeshan oona la soo gudbi dukumeentiyadaada. Waa in aad meesha ka saartaa ama qarisaa (madoobeysaa) xog kasta oo aanad doonayn in lala wadaago waalidka kale, qolada kale ee kiiska ku jirta, iyo/ama wakiilkooda. OAH WAX MACLUUMAAD AH KAAGAMA SAAREYSO MEESHA OO WAXAANA LAGA YAABAA IN DUKUMEENTIYADAADA LA DIIDO.**

Haddii aysan ka ahayn in si ka duwan uu u amray Garsooraha Sharciga Maamulka (Administrative Law Judge, ALJ) mooyaane, waa in aad soo gudbisaa dhammaan dukumeentiyada ama dukumeentiyada taageerada ee aad rabto in Garsooraha Sharciga Maamulka uu arko ugu yaraan shan maalmood oo shaqo ka hor dacwad dhageysiga. OAH ma aqbali karto dukumeentiyada cabbirkoodu yahay 2.0 gigabaytis (giga bites, GB) ama wax ka weyn. OAH waxay diidi doontaa dukumeenti kasta oo cabbirkiius yahay 2.0 GB ama wax ka weyn. OAH waxay ku aqbali kartaa dukumeentiyada taageerada ee muuqaal ahaanta ah qaababkan soo socda: .mp4, .avi, .mpg, .mpeg. OAH waxay diidi doontaa dukumeentiyada taageerada ee muuqaalka ah ee lagu soo gudbiyo qaab kasta oo kale. OAH waxay ku aqbali kartaa dukumeentiyada taageerada ee maqalka ah qaabkan soo socda: .mp3. OAH waxay diidi doontaa dukumeentiyada taageerada ee maqalka ah ee lagu soo gudbiyo qaab kasta oo kale.

LAGU SIIYAY taariikhda boosto soo dhigista, lagu shaanbadeeyay kor.

| | |
|---|---|
| Maamulka Sharciga ah: | RCW 74.20A.059, WAC 388-14A-3925, iyo ch. 388-02 WAC |
| Ku lifaaqan: | Codsiga Dacwad Dhageysiga |
| Ku lifaaqan | Soo koobidda Xuquuqda Dacwad Dhagaysiga |

Wakiilka DCS
Magaca Wakiilka Hay'adda
Ciwaanka Wakiilka Hay'adda

TUSAALE

**Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto dukumeentiyada aad heshay.**

SHAACINTA/CADDEEYNTA ADEEGGA (DECLARATION OF SERVICE)

Waxaan ku caddeenayaa sida hoos imaata ganaaxa been-abuurka ee hoos timaada shuruucda Gobolka Washington in maanta aan u gudbiyay dukumeentigan mid kasta oo ka mid ah dhinacyada hoos ku taxan. Waxaan koobi u diray dhinacyada ciwaankoodu ku jiro diiwaanka anigoo isticmaalaya Adeegga Boostada ee Isku-dhafka ah, Boostada Mareykanka, ama iimayl amni-sugan.

Liiska qof kasta oo loo soo diray Ogeysiiskan Dacwad Dhageysiga.

Ku taariikheysan Taariikhda marka Ogeysiiska Dacwad Dhageysiga boostada looga soo diray goobta Magaalada, Washington.
(TAARIIKHDA BOOSTO KU DIRISTA)

____________________________________
Wakiilka
Xafiiska Dacwad Dhageysiga Maamulka

TUSAALE

**Kani waa tusaale bixinaya macluumaad guud oo kaa caawinaya inaad barbar dhigto dukumeentiyada aad heshay.**